

Amarka Ka Saarida Diiwaanada Aan Dhameystirnayn Ama Aan Buuxin (Foomka Cad)

Waa maxay foomkan?

Foomkaan waa ogeysiis sharci ah. Iyada oo ku saleysan diiwaanka tallaalka ee dugsiga ilmahaaga ama xananada canugga, ilmahaagu waxaa ka maqan tallaalkada ama wax baa u baahan in laga saxo diiwaanka. Diiwaanka waa in la cusbooneysiyo Maalinta Ka Saarida ama ilmahaagu ma loo oggolaan doono inuu tago dugsiga ama xannaanada ilmaha ilaa diiwanada laga cusbooneysiyo.

Ka waran haddii ilmahaaga horay u qaatay tallaalka warqadda ku qoran?

U gee diiwaanka dugsiga ilmahaaga ama xannaanada ilmaha oo cusbooneysiis nuqulka diiwaanka dugsiga. Haddii aadan haysan nuqulka diiwaanka wac xafiiska dhaqtarka ama ALERT IIS, diiwaanka tallaalka Oregon, adiga oo ka wacayo 1-800-980-9431 si aad nuqul u hesho.

Ka waran haddii ilmahaagu aanu qaadan tallaalka warqadda ku qoran?

Ballan u qabso sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah si aad u hesho tallaalka. Xafiisku ha ogaado in ilmahaaga laga soo diri doono dugsiga ama xannaanada ilmaha tallaalka la,aan. Haddii aanad lahayn dhaqtar, wac 211, waxay kaa caawin karaan inaad hesho tallaalkada. Markaad hesho tallaalka, hubi in dugsiga ama xannaanada cunugga uu helo nuqul, si diiwaanka cunuggaga loo cusbooneysiyo.

Ka waran haddii warqada muujiso in wax maqan yihiin ama dhammeystirnayn?

Cusbooneysiis waxa maqan ama aan dhammeystirneyn kahor Maalinta Ka Saarida si cunuggaagu u sii joogo dugsiga.

Ka waran hadduu dhaqtarku kuu sheego in ilmahaagu aan la tallaali karin?

Oregon waxay oggolaataa ka-dhaafitaanka caafimaad. Waa qasab inuu saxiixaa dhaqtar ama waaxda caafimaadka deegaanka. Haddii aad u maleyneyso in cunuggaagu u baahanyahay ka-dhaafitaan caafimaad, la hadal bixiyaha daryeelka caafimaad ee ilmahaaga.

Ka waran haddii aad doorto in aan la tallaalin?

Oregon waxay oggolaataa ka-dhaafitaanka aan caafimaadka ahayn. Si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida loo helo ka-dhaafitaanka aan caafimaadka ahayn, booqo www.healthoregon.org/vaccineexemption.

Ka waran haddii aad su'aalo qabto?

Wac waaxda caafimaadka deegaanka ee ku qoran ogeysiiska sharciga ah. Way kaaga jawaabi karaan su'aalaha aad qabto.